

Natiijadii ka soo baxay barnaamij cilmi-baariseed Lagacaha dadku dibadaha ka diraan xaaladdeedu ma sugna Xaaladda Soomaalida

Arar

Xawilaad – waa lacagaha ay dadka dibadaha u soo haajiraa u diraan qoysaskoodii ay ka soo tageen. Lacagaha la xawilaa waa dhaqaale weyn oo gala dalalka soo koraya. Macluumaadka laga ogyahay lacagaha loo diro meelaha colaaduhu saameeyeen waa mid xaddidan. Waxaa tusaale muhiim ah loo soo qaadan karaa dhulka Soomaalida. Dagaalkii sokeeye waxa uu keenay in dad badani dibadaha u qaxaan, lacagaha ay diraan waa dhaqaale weyn oo joogto ah. Barnaamijkan cilmi-baariseed waxa uu xoogga saaray in uu darso lacagaha loo xawilo magaalada Hargeysa iyo Nairobi iyo Landhan. Waxa ay hawshan cilmi-baaristu isku taxalujisay in wax laga ogaado dhaqdhaqaaqa habka lacagaha la xawilo iyo sida ay u saamayso noloshada dadka. Cilmi-baaristani waxa ay ahayd daraasaad PhD ah oo socday 2003 -2006. Waxaan waraysiyo ka qaaday 120 qof isla markaana waxaan sameeyey xog ururin ku saabsanayd dadka lacagaha loo diro oo gaaraya 538 qof kuna sugnaa magaalada Hargeysa iyo 175 qof oo dadka lacagaha dira ah kuna sugnaa magaalada Landhan.

Waxyaalihii ugu muhiimsanaa ee ka soo baxay cilmi- baariista

Wixii ka horreeyay dagaallada Soomaalida guud ahaan ragga ayaa u soo haajiri jiray dalalka khaliijka. Colaaduhu arrintan wax bay ka beddeleen. Waxaa kordhay lacagaha laga soo diro Yurub iyo Waqooyiga Ameerika taas oo ah waddamadda qaxooti badani ku noolyihiin. Dadka qaxootiga ku ah dalalka Soomaaliya la deriska ah oo ku nool duruufo aad xun mararka qaarkood iyaga ayaa lacago dira, una dira dad gudaha Somalida ku nool, mararna iyaga ayaa loo soo diraa. In kasta oo ay weli u muuqato in ragguna kuwa lacagaha dira yihiin dumarkuna kuwo loo diro, kaalinta weyn ee dumarku ay ka geystaan lacagaha la diro waxa ay tusaysaa in arrintan wax iska beddeleen.

Dad badan oo dhulka Soomaalida ku sugan iyo kuwo goobo kala duwan ku soo barakacayba waxa ay helaan lacago. Qaarkood biil joogta ah ayay helaan, qaar kalena si joogta ah uma helaan. Dadka lacagaha loo diro qaarkood, lacagaha xawilaaddu waa qayb ka mid ah ilaha dhaqaale ee nolol-maalmeedkoodu ku tiirsantahay oo meelo kala duwan ay ka helaan. Qaar kalena lacagaha la xawilaa waa waxa kaliya ee nolol-maalmeedkoodu ku tiirsantahay. Xog ururin dadka lacagaha loo diro lagaga qaaday goobaha lacaga xawaalladda ay ka qaataan ee magaalada Hargeysa waxa ay muujinaysaa in isku cel-celis dadkaasi kala bar waxa ay sheegeen in aan dakhli meel kale ka soo galin. Cuntada iyo waxyaalaha kale ee daruuriga ah ee dadku lacagaha loo diro ku iibsadaan marka laga reebo, dadku lacagaha ay helaan waxa ay ka caawisaa waxbarashada iyo caafimaadka. Lacagaha la diraa siyaabo kale ayay dadka qaarkiis u caawisaa, sida in ay ka badbaadaan colaadaha iyo dhibaatooyinka kale ee soo foodsara.

Kaalmaynta nolol-maalmeedka dadka degaannooda ku nool magaalada Hargeysa, maal-gelinta lacagaha xawilaaddu waxa ay noqon kartaa mid ballaaran oo noloshada dadka wax ka beddeli karta taasna waxaa keena dadka soo haajira qaarkood oo diraya lacag maal-gelin ah oo lagu shaqeeyo. Waxaa lacagan lagu maal-gelin karaa ganacsiyada sida dukaammada, ganacsiga alaab soo dajinta iyo dhoofinta, taksiyada, basaska ama baabuurta xamuulka ah. Muhiimadda ganacsiga iyo adeegyada la siiyay waxa uu muujinayaa in wax soosaarku yaryahay iyo ganacsiga magaalooyinka ka socda guud ahaan. Nabad gelyada oo yara hagaasan, sharciyada wax lagu maamulayo oo xaddidan, isgaarsiinta taleefoonnada oo wanaagsan iyo habka xawilaadda lacagaha oo mid shaqo fudud ah ayaa waxa ay kordhinayaan maal-gelinta lacagaha la diro. Laakiin waxaa xannibaad ku ah horumar la'aanta guud ee jirta, hababka lacagaha lagu amaahdo oo xun, dhinaca siyaasadda oo aan la hubin iyo fakhriga haysta dadka dibadaha ku nool.

Saameynta ballaaran ee xagga siyaasadda dhaqaalaha ee deegaannada - Lacagaha xawilaaddu badanaa waxay gaartaa magaalooyinka laakiin lacagaha dibadaha dadku ka diraan qaarkeed waxay u gudubtaa

dhulalka miyiga iyo xeryaha qaxootiga. Habka qabiilka iyo xaaladda dhaqaalaha bulshada ayaa xukuma socdaalka dadku dibadaha ku tagayaan taas oo saameyn ku leh sida lacaga dibadaha laga soo diraa dadka u wada gaaraan ama guud ahaan loo qaybsado. Marka Hargeysa la fiirsho, dadka sida joogtada ah lacagaha loogu diraa waxay u muuqdaan kuwo dakhligoodu dhex-dhexaad yahay inkasta oo ay badanaa si weyn ugu tiirsanyihiin lagahaas dibadaha uga yimaadda. Waxaa kale oo jira dhaqdhaqaaq lacageed oo ku yimaadda isku xirnaanta bulshada, dhaqaale lacageed oo ka yimaadda qoysaska ladan una gudba kuwa faqiirka ah iyo lacag ka tagta maagaalooyinka oo qoysaska miyiga u gudubta. Waxaa taa weheliya dhaqdhaqaaq lacageed ama lacag is-weydaarsi ku yimaadda xiriirka suuqyada ka dhexeeya. Isticmaalka lacagahan dibadaha laga soo diro waxa uu kor u qaaddaa baahida loo qabo alaabooyinka, adeegyada iyo shixnadaha alaabada dibadda ka imaanaysa. Maal-gelinta la maalgashanayo dhulalka iyo dhismayaasha taas oo ay wadaan dadka dibadaha ku nool oo uga sii daray ama kor u sii qaaday dhismaha sida xoogga leh magaalooyinka uga socda. Dadka dibadaha ku nooli siyaalo kala duwan ayay uga qayb-qaataan nabad raadinta iyo colaadda. Tusaale ahaan, magaalada Hargeysa lacagaha dadka dibadaha ku nooli ku deeqaan waxay kordhisaa colaadaha iyo dimoqraadiyadda bilowga ah ee Soomaliland ka jirta labadaba. Islamarkaana waxay gacan ka geystaan dugsiyada waxbarashada iyo istibitaallada, iyo waxay dadka ku caawisay in ay ku laabtaan dibna u dhisaan magaalada oo ahayd mid laga wada qaxay dhammaanteedna la burburiyay.

Lacagaha la diro iyo socdaalka dadka oo isla tallaabo qaada – Lacagaha la diraa waxay suurta galiyaan ama gacan ka geysan karaan socdaalka dadka. Tusaale ahaan, socdaalka dadka ee ka dhexeeya Soomaaliya iyo Keenya ama xeryaha qaxootiga iyo maagalada Nayroobi. Dadka dibadaha ku nooli waxay gacan ka geystaan socdaalka dadka, sida soo dhoofinta qof qaraaabo ah oo doonaya in uu Bariga Dhexe (dalalka carrabta) ama dalalka Aasiya ka shaqaysto ama wax ka barto ama in lagu caawiyo in ay Yurub ama Waqooyiga Ameerika soo galaan. Lacagaha la diraa waxay dhiirigelin karaan socdaalka dadka ee dunida iyada oo soo dhoofinta dadka loo arko in ay faa'iido u leedahay qofka laf ahaantiisa iyo tan qoyskiisa uu ka soo tagayba. Mas'uuliyadda lacagaha la xawilo waxay keentaa in aan dadku ku laaban dalalkii ay markii hore ka yimaaddeen, xitaa meelaha xasilloonidu ka jirto. Kuwa hadda iyagu dibadaha ku nool ayaaba dad hor leh soo dhoofin kara si ay culayska dhaqaale ee lacagaha la diro ula qaybsadaan.

Cid uun baa bixin: Dadka reer Landhan oo nolol-maalmeedkoodu u qaybsanyahay Waqooyi iyo Koonfur – Waxaa jira khasaare dhaqaale iyo mid bulsheed oo dadka dibadaha ku nooli la kulmaan. In kasta oo dadka lacagaha diraa qaarkood ay maamuli karaan culays dhaqaale ee lacagaha la diraa keenaan, qaar kale ayaa la kulma dhibaatooyin dhaqaale oo kaga yimaadda sidii ay isugu wadi lahaayeen shaqooyinka dakhliga ka soo galaa uu hooseeyo iyo bixinta lacagaha ay ballanqaadeen in ay si joogta ah u dirayaan. In kasta oo lacagaha la dirayaa ay muujinayso xiriirka iyo kalgacalka ay dadka lacagaha diraa u qabaan eheladooda ay ka soo tageen, dhibaatooyinka bulsheed ee arrintan la xiriirta waxaa ka mid ah wel-wel, dhibaatooyin dhex-mara dadka is-qaba iyo iska hor-imaadyo ka dhex dhaca jiilasha kala duwan ee qoysaska dibadaha ku nool dhexdooda. Lacagaha dibadaha laga dirana waxaa mustaqbalka saameyn ku yeelan doona sida dadku dalalka ay ku noolyihiin ula qabsadaan, da'dooda iyo sida aragtiyahoodu isku beddelaan.

Kaalinta ay nidaamka xawilaadda lacagaha ee Soomalidu leedahay – Iyada oo aysan jirin nidaamyo bangi oo rasmi ah ayaa qaababka xawilaadaha lacagaha ee Soomaalidu, oo caam ahaan loo yaqaan *Xawilaad* waxay ciyaartay door weyn, sida isku xirrida dadka ku nool deegaannada Soomaalida, dalalka deriska ah iyo kuwa qurbaha ku nool. Shaki iyo baaris ayaa ku yimid qaabkan lacagaha lagu diro ee Soomalida sanadkii 2001 ka dib markii shirkaddii ugu weynayd ee (Al Barakaat) la xiray iyada oo laga duulayo eedayn Maraykanku ku eedeeyay in ay xiriir la lahayd Al Qayda. Waxaa dhacaysa in ganacsiyada shirkadaha lacagaha xawila qaarkood horumaraan halka kuwo kale xirmaan iyada oo ay ku xirantahay hadba sida sharciyada dalalka kala duwan ka jira isku beddelaan.

Arrimaha siyaasadda – Qurbe ku noolaanshuhu waa waxyaalaha laga dhaxlo colaadaha, waxayna u muuqataa mid sii soconaysa, saameynna ku yeelan doonta qaabka bulshada Soomalidu yeelan doonto tobannaanka sano ee soo socda. In kasta oo aan shaki ku jirin in lacagaha la diraa ay nolosha dadka loo diro wax ka beddesho, haddana tan looma fasiran karo horumar ballaaran oo guud ahaan uu helayo dalkii asal ahaan dadka lacagaha diraa ka yimaaddeen, xal waarana u noqonmayso dhibaatooyinka dadka soo barakaca. Dariiqa ugu fiican ee lagu heli karo faa'iidada ugu weyn ee lacagaha la diraa yeelan karaan mustaqbalka fog waxaa weeye in la hagaajiyo nidaamka siyaasadaha iyo tan dhaqaale ee dalalka dadka lacagaha dirayaa ka yimaaddeen iyo in la hubiyo xuquuqda asaasiga ah ee aadamiga ee dadka qaxootiga ah. Waxaa jira tillaabooyin khaas ah oo la xiriira qorshaha siyaasadeed ee arrintan, kuna habboon in la tixgaliyo. Tusaale ahaan:

- Waa in ay furnaadaan waddooyinka lagacaha lagu xawilo – joojin ama jaah wareer lagu rido noloshan dhaqaale waxay noqon doontaa mid is-gaarsiinta Soomaalida ee Geeska Afrika u keenta waxyeello weyn.
- In la raadiyo habab kale oo lagu maamuli karo lacagaha lagu xawilo meelaha aan dhibaatooyinku ka jirin.
- Kor u qaadista xiriirada ama wada xaajood dhexmara aragtiyaha samafaleed ee dadka dibadaha ku nooli soo jeediyaan iyo hayadaha samafalka ee caalamka (NGOs) iyo dadka deeqaha bixiya.

Cilmi-baare:

Warbixinta oo dhan waxaa laga helayaa:

Anna Lindley, ESRC Postdoctoral Fellow, COMPAS

www.compas.ox.ac.uk/about/biog/anna.lindley@compas.ox.ac.uk.shtml